

Ilaalinta jiinka webiga

Kiishash bacaad ku jiro oo si haboon loo dhigay waxay dib leexin karaan biyaha, dhoobada iyo waxa soo dumay laakiin si dhamaystiran uma xiri karaan biyo oo dhan. Waxaa si ku meel gaar ah loo isticmaalaa Kiishash bacaad ku jiro si loo xiro af ka furan jiinka webiga ama in kor loogu qaado heerka jiinka webiga si looga hortago biyo ka soo baxa webiga.




Food and Agriculture Organization of the United Nations

SWALIM

- ✓ Marka ay suurogal tahay, isticmaal kiishash ka samaysan xaskul (xig) haddii kale isticmaal kiishash bac (nylon) ah.
- ✓ Kala bar buuxi kiishashka bacaadka. Istimmaal bacaad haddii la heli karo, haddii kale waa la isticmaali karaa ciid kaste oo meesha laga helo.



- ✓ Meesha ka qaad waxa burbursan iyo waxa ku hor-gudban goobta la dhigi doono kiishashka bacaadka.
- ✓ Marka la dhigayo kiishash bacaad ah, xagga sare ee afka kiishashka hoos u laab hadana marka aad qotominayso af laaban ee kiishashka kor mari.



- ✓ Kiishashka kala-barka la buuxiyey waa in si jiif-dherer ah loo dhigo iyo si barbareysa loogu beego jahada biyuhu u socdaan ayadoo la hubinayo in aysan jirin godalolo u dhexeeya kiishashka.



- ✓ Kiishashka bacaadku ku jiro waa in qaab aan isku toosnayn oo lakabyo ah loo dhigo ama loo tuumiyo sida qaabka ahraamta (eeg jaantuskan).



- ✓ Waqtii ayey qaadanaysaa in la dhiso gidaar/darbi kiishash bacaad ah. Hore u qorshee! Waxaa aad u sahlan tahay in aad kiishashka bacaardka dhigtid ka kor inta aysan bilaabmin heerarka kor u kaca biyaha webiga.

Taariikh ahaan, fatahaada webiyada Jubba iyo Shabelle jiinkooda waa masiibooyin dabiici ah oo inta badan dhacda. Sanadahan dambe, waxa sii kordhay halista fatahadu is xig xiga oo ka dhaca meelaha joogoogu hooseeyo ee labadan webi. In kast oo ay fatahaadu dhacaan labada xilli roobaad haddana waxay soo noqnoqsho badan yihiin xilli deyreedka. Dhacdooyinka fatahaadu waxay horseedaan khasaare dhaqaale ay ee burburaan kaabayaal, dhul beeraad maashooba, xoolo (duunyo) le'da iyo weliba dad ku naf waaya.



Fatahaadu waxay dhici karaan wakhti kaste iyo meel kaste. Waxayna u dhaci karaan si deg deg ah. Marka haddii aad ku nooshahay meel biyo u dhow ama meel kalaba, waa in aad u diyaargarowdaa. Halkan waxa ku jira waxyaabo muuhiim ah si aad ugu diyaargaroobi kartid.

Somalia Water and Land Information Management
Ngecha Road, off Lower Kabete Road, P.O. Box 30470, NAIROBI
Tel: 254 02 4000000/300 Fax: 254 02 4000333 Email: swalim@fao.org
Funded by the European Union and Common Humanitarian Fund
Implemented by the Food & Agriculture Organization of the United Nations



Waa maxay Fatahaad?

Fatahaadda webigu waa daad caadiga ah oo ku dhaca meel qalalan taasoo ay sababtay kor u kaca heerka biyaha webi ku jira. Fatahaaddu waa biyobaxo ay keenaan kor u kac degdeg ah ee biyaha qaadaya caloosha webiyada/dooxyada ama dhulka hooseeya. Fatahaadaha ka dhaca webiyada Jubba iyo shabeelle gudaha Soomaaliya waxaa sabab u ah roobab xad-dhaaf u da'a waqtii kooban, dhacdo roobab maliigaan oo muddo dheer da'a ama webiyada jiinkooda oo la faruuray.

- ✓ Fatahaadu waa wax lama filaan ah u dhaca oo burbur keena , waxayna ka dhici karaan gobolo aan waligood roob lagu arag.
- ✓ Waxay sababi karaan dhimasho iyo dhaawacyo, go'doomin bulsho, waxyeeyen kaabayaal muhiim ah, goynta adeegyo muhiim ah, burburinta hantiyeed iyo saldhig- nololeed.
- ✓ Taariikh ahaan, fatahaadaha webiyada Jubba iyo Shabeelle waa masiibooyin dabiici ah oo in badan dhaca. Waayhan dambe, waxaa muuqanaysay kororka khatarta ba'an iyo soo noqnoqshada fatahaadaha ka dhaca meelaha hooseeya ee jiinka labada webi. Dhacdooyiinkii fatahaadaha ugu halista badan ee u dambeeyey waxay ahayeen kuwii deyrhii 1961, 1977, 1997, 2006, 2008, 2013 iyo 2014 iyo daadadkii gu'yaashii 1981 , 2005 iyo 2013. Qaar ka mid ah dhacdooyinka daadadkani waxay horseedeen burbur weyn oo dhaqaale kuwaasoo baabiyey kaabayaal, dhul beereed biyo ku fataheen, xooolo dhintay iyo dad ku naf waayey.

Meeshee ayaan ka heli karaa xogta sadaasha ka digista daadadka?

Daaro raadiyaha dagaanka iyo xarumaha telefishanka (fogaan araggaa) si aad u heshid xogta sadaasha ka digista fatahaadda meeshaada.

FAO – SWALIM waxay soo saartaa xogta sadaasha ka digeysa daadadka ka hor iyo inta lagu jiro xilliyada roobabka. SWALIM waxy bixisaa sadaal roob iyo heerarka maalinle ee biyaha webiyada Jubba iyo Shabeelle. Xogta waxaa lagu wadaagaa isticmaalka email-lo (emails).

Haddii aad heli kartid isticmaalka email, waxaad soo waydiisan kartaa xogtaan adigoo codsi u so diraya email-ka cinwaankan leh : swalim@fao.org.

Sidoo waxaad ka soo warami kartaa fatahaad adoo isticmaalaya isla email-kan.

U diyaargarow fatahaad ka hor

Soomaaliya waxaa ka dhacay fatahaado badan oo burbur keenay. Haddii gurigaagu u dhow yahay webiga ama dhul meel hooseysa ku yaal, daadad ayaa ku fatahi kara, xitaa haddii biyaha daadadka aan meeshaas lagu arkin. Aydoor aan roobku helin meeshaada, haddana daadku waa ka dhici karaa. Waa laga yaabaa in aad ku xanibanto maalmo badan ilaa inta daadadku yaraadaan ama waxaad bilo godoon ku noqon kartaa goobo fog fog.


Haddii ay u badan tahay in daad uu meeshaada ka dhaco, waxaad samayn kartaa firfircoonaan hordhac ah si aad uga yareysid hantidaada waxayeello. Talooyinka soo socda qaado si aad u yareysid xaddiga waxyeelada daadadka haddii ay jirtaba:

- ✓ La soco raadiyaha, foogaan aragga (telefishanka) iyo internet-ka marka ay ka digayaan daadadka.
- ✓ Banee biyo mareenada iyo keliyada.
- ✓ Diyaarso qalabka gurmada oo ay ku jiraan waraaqaha kuu muhiimka ah, daawooyin iyo wax alaale waxii laga yaabo in aad u baahatid haddii ay kugu qasabto dhowr maalmood in aad ka maqnaato gurigaaga ama goobtaada ganacsii.
- ✓ Kala xiriir-fur qalabyada loo isticmaalo korontada.
- ✓ Meel sareysa dul dhig guriga qalabkiisa, dharka iyo waxii qiime leh adoo saaraya sariiraha, miisaska iyo saqafka/sofiitada kore.
- ✓ Iska nabadgeeli waxyaabaha halista leh, baabuurtu dhig meelo kale, qalab dibedeedka, weelka qashinqubka, kimikooyinka iyo suntu dhig goobo badbaadsan.
- ✓ Webiga jiinkiisa furan ama meelaha carrotturka diciifka ah leh waa halis haddii biyaha heerkoodu kor u kaco. Waan la xiro xilli roobaadka ka hor.

Waxa la samayn karo ama waxaan la samayn karin xilligga daadadka

Haddii ay fatahaad jirto, meesha gurigaaga ugu badbaado badan waa inaad joogto, haddii aynan jirin biyo daad oo ku saamaynaya, doobo ama waxyaalo soo dumay. Haddii lagu waydiyo in aad qaxdo, si deg deg u same isla markaasna aad meelaha dhulku sareeyo. Haddii si lama filaan ah biyahu kor ugu kacaan oo aad kari waydo in aad qaxdo, saqafka sare fuul.

- ✓ Xusuusnaw in aad qaadatid sahaydaada gurmada iyo waxa qiimaha leh marka lagu sheego in aad meesha ka socdaasho aad oo u baxso goobaha dhulka sare.
- ✓ Ka fagow biyaha daadadka oo ka dheerow biyaha socda. Ha isku dayin inaad lug ku jirto biyo socda, inaad dabaalatid ama baabuurtu aad ku dhex wadid. In yar biyo socda ah oo 15cm (santi mitir) jog ah leh waa ay ku minjo xaabinkaraan. biyo socda oo 600 cm ah waxay awoodaan in ay qaadaan baabuurtu rakaab ah.
- ✓ Si joogta ah ula soco qalbka war-baahinta iyo ilaha kale ee xogta hawada baahiya iyo gurmada degdeggaa akhabaaraaha ugu dabmbeeyaa.
- ✓ Marka aad qaxaysid, ogow oo ka war hay laagaha dooxyada, laagaha biyo mareenada, meelaha kale ee daadadka lagu yaqaan.
- ✓ Daadad kedis ah waxay dhici karaan ayadoo aan digniin jirin. Iska jir baabuurtu in aad dhigtid dooxyada agtooda. Waxa laga yaabaa in ay dhaqso biyahu kor u kacaan.
- ✓ Iisticmaal jid labaad oo lagu baxsan karo haddii biyahu xiraan jidadka muhimadda kowaad kuu leh waqtiga qaxitaanka.



Fatahaadda Ka dib

Qaxitaanka ka dib, gadaal ha u soo noqon ilaa inta daadku dib u gurayaan oo maamulku dib ugu furayo goobaha dadkii deganaan jirey. Waa in si taxadir ku jirto loo abaaro goobihii daadadku saameeyeen. Ka joog oo ha u dhawaan biyaha daadadka waxa laga yaabaa in ay xanuunno xambaarsan yihiin

- ✓ Ka fagow meelaha ay waxyeeleen biyaha daadadka, dhoobada ama burburka ruqay.
- ✓ Si joogta ah warbaahinta ula soco iyo ilaha kale ee xogta laga helo, saa daadad dheeri ah ayaa dhici kara.
- ✓ Ha ku wadin baabuurtu agagaarka meelaha xanniban. Marinadii Jidatka waxa la yaabaa in daad qaaday, hoos udegeen ama biyaha daadadku ay wiiqueen.
- ✓ Joog dhul adag korkiis. Haddii lagugu khasbo in aad ku lugaysid goob dhooboo qarisay ,isticmaal ul si aad u hubsid qiyaasta qoto-dherarka dhoobada kaa horeysa.
- ✓ Is ka jir biyaha fadhiya. Waxa laga yaabaa in ay wasakheeyeen saliid, bullaacad ama koronto dhulka hoostiisa marta ay dabaysay ama xarkaha dabka korotada dhul hoos mariyey.
- ✓ Daadadku waxay sababi karta inay meelo caan ah wax ka bedesho . Waxaa laga yaabaa biyaha daadadku burburiyeen wadooyin iyo jidad yar yar. Goobatu waxay noq kartaa kuwo aad loogu sambiririxdo ama siibto oo ay ku lugeyntu adag tahay. Burburka daadadku waxuu qarin karaa xoolo, jajab dhalooyin ama waxyaalo kale oo halis leh.
- ✓ Taxadar sare u lahay marka aad gelyso dhisme kasta oo ay haleeleen biyaha daadad, dhoobada ama burbur. Biyaha daadadka waxa laga yaabaa in sababaan waxyeelo qarsoon, habab koronto oo waxyeelo qaba ama asaaska dhisme wiiqmay.